AcadeMedia

Maareynta macluumaadka shakhsiga

Macluumaad ku saabsan qofka ardayga ama masuulka ah ee dugsiga sarre ee ka midka ah AcadeMedia.

Waxa waxqabadyada AcadeMedia laga isticmaalaa adeegyada dhijitalka ah oo kala duduwan. Kuwani waxa loo adeegsadaa maamulka, maareynta safka, qiimeynta, qorsheynta koorsada iyo casharrada, iyo xataa sidoo kale wixii taageerida tooska ah ee shaqada waxbarashada ah. Sida qeybta ka ah taas ayaan soo ururinaa oo aanu kaydinnaa macluumaadka shakhsiga ee adiga kugu saabsan. Tusaalooyin ka mid ah xogta shakhsiga ahi waa sida magaca, lambarka shakhsiga iyo macluumaadka xiriirka. Waxaan sidoo kale nidaamkayaga ku diiwaangelinnaa noocyada kale ee macluumaadka shakhsiga, sida tusaale ahaan qorshayaasha waxbarashada, imaanshaha, qiimeynta iyo natiijada/darajada iyo sidoo kale warbixinta ku saabsan caafimaadka ee ka qeybta shaqada dugsiga ee caafimaadak ardeyga.

Waxay adiga iyo anagaba muhiim inoo ah inaanu macluumaadka shakhsiga u maareyno si sugan oo mas'uuliyad leh. AcadeMedia gudaheeda, waxaanu samaynay habraac ku saabsan sida aan u maareynayno macluumaadka shakhsiga iyo sida aan ula shaqeyneyno adeegyada dhigitaalka ah. Qoraalka soo socda wuxuu ku siinayaa macluumaad kooban oo ku saabsan xuquuqdaada iyo anaga shaqadayada. Macluumaad buuxa oo faahfaahsan oo ku saabsan sida aan u maareynayno macluumaadkaaga shakhsiga waxaad ka heli kartaa trygg.academedia.se.

Anaga masuuliyadayada iyo adiga xuquuqdaada

Anaga maareyntayada iyo keydintada xogta shakhsiga waxay u dhacaysaa sida waafaqsan waxa loo yaqaan, xeerka ilaalinta xogta, kaas oo sharci ahaan ka shaqeynaaya dhammaan dalalka EU-da laga soo bilaabo 25-ka Maayo 2018. Maareynta xogta shakhsiga ee hawlaha waxqabadka dugsigeenna waa la oggol yahay sababtoo ah waxay dhacaysaa si aanu ugu awoodaan inay fuliyo waajibaadka raacitaanka sharciga. Xaaladaha qaarkood, waxaan ku weydiisaneynaa ogolaansho si aan u maareyno macluumaadkaaga shakhsiga, gaar ahaan taasi waxa la sameeyaa ka hor inta aan lagu baahin warbaahinta bulshada ama mararka qaarkood wixii suuqgeyn ah. Waxaad markasta la soo noqon kartaa ogolaanshahaaga. U tag markaa wakiilkaaga ilaalinta xogta, macluumaadka lagala xiriiro iyaga ayaa ku yaal dukumentigan hoostiisa.

Adiga xuquuqdaada ayaa dabcan aad muhiim noogu ah. Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato diiwaanka macluumaadka shakhsiga ee aanu adiga kaa maareynay, fadlan la xiriir markaa wakiilkaaga ilaalinta xogta adigoo arji qoraal ah oo saxeexan wata. Waxaad sidoo kale codsa kartaa saxitaan ama in la tirtiro adiga xogtaada shakhsiga ah iyadoo la soo maraayo wakiilkaaga ilaalinta xogta. Waxaanu had iyo jeer isku daynaa inaan ku caawino oo aanu kaaga jawaabno arimahaas, laakiin waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad wixii cabashooyin ah kala xiriirto Kormeeraha Xogta (Datainspektionen) haddii aad rumeysan tahay in macluumaadkaaga shakhsiga loo maareeyey si qaldan.

Inta lagu jiro waqtigaaga aad dugsiga ku jirto ayaa waxa laga yaabaa inaan wax ka bedelno sida aan ugu maareyno macluumaadkaaga shakhsiga sidaas daraadeed ayay marwalba ugu jirtaa mid la cusbooneysiiyey oo warbixintan ah oo laga heli karro trygg.academedia.se. Haddii uu yimaado isbedel weyn, ayaa shakhsi ahaan laguu soo sheegi doonaa.

Masuulka macluumaadka shakhsigu waa maamulaha (shirkada dugsiga) uu dugsigaagu qeybta ka yahay. Haddii aanad hubin la xidhiidh dugsigaaga ama AcadeMedia kala xidhiidh emaylkoodainfo@academedia.se.

Waxaan ilaalineynaa arimahaaga gaarka kuu ah

Adiga arimaha gaarka kuu ah ayaa marwalba la ilaalin doonaa, isla mar ahaantaana waxaan daneynaynaa inaanu kuu diyaarino xanaano waxqabad fiican leh. Qaar ka mid ah macluumaadka shakhsiga ee adiga kugu saaban ayaanu sidaas daraadeed lala wadaagi doonaan kuwa u baahan in ay ogaadaan macluumaadkaas si ay ugu gutaan shaqadooda ay ka qabtaan ururkayaga. Kuwaas

waxa ku jiri kara macluumaadka ku saabsan xasaasiyada/alerjiyada ama go'aamada ku saabsan la qabsiga waxbarashada.

Shaqadayada dugsiyada ee caafimaadka jidhka iyo cilmi nafsigu ee caafimaadka ardayga waxay ka baxsan tahay waxqabadyada waxbarashada, waxaana maamulaaya sida tusaale ahaan, sharciga daryeelka caafimaadka. Taas macnaheedu waa in shaqaalaha kale ee dugsigu aanay heli karin warbixinta iyo macluumaadka shakhsiga ee lagu maareeyo waxqabadkaas.

Waxaanu si joogto ah ugu sii wanaajinaa habkayaga waxqabadka iyo xeerarkayaga si aan ugu ilaalino nidaamkayaga in cidi si qaldan ugu soo gasho macluumaadkayaga, khasaare aan si kas ah loo sameyn ama burbur. Waxaan mar walba xogta shakhsiga ee xasaasiga ah u maareynaa sida waafaqsan sharciyada iyo xeerarka khuseeya, iyadoo la isticmaalaayo amaanka ugu sareeya.

Adeega cloud-ka

Waxaanu isticmaalno waxyaabo ay ka mid yihiin, adeegyada dhigitalka ee loo yaqaanno adeega cloud-ka (adeega daruuraha). Isticmaalka cloud-ku waxa uu na siiyaa fursado badan oo ay ka mid yihiin, tusaale ahaan

- fursado ka badan oo lagu wada shaqeynaayo
- in si ka fudud waxyaalaha waxbarashada loogu wadaago warbarashada dhexdeeda iyo dunida inteeda kaleba.
- in la helo adeegyada goobta iyo wakhtiga ay doontaba ha ahaatee

Adeegyada cloudka micnahiisu waa in macluumaadka lagu kaydiyo shirkadaha noo keenay adeega oo meel ka baxsan jooga iyadoo qofka isticmaalayaa uu ka helaayo internetka. Tusaale ka mid ah adeega cloud-ka ee aanu isticmaalno waxa ka mid ah Google Suite for Education iyo Microsofts Office 365. Macluumaadku waxa wali iska leh dugsiyada AcadeMedias iyadoo aanu maamulno cida kaas heli karta. Si loo damaanad qaado in aan macluumaadka shakhsiga la sii fidin ayaanu heshiis la galney cid kasta oo wax noo keenta.

Maxaa dhacaaya marka la dhameeyo waxbarashada?

Haddii aad rabto inaad haysato walxahaaga waxbarashadaaada ka dib, waxaad u baahan doontaa inaad adigu u wareejiso koonto khaas ah ama meel lagu keydiyo oo gaar ah. Ma keydineyno macluumaadkaaga shakhsiga mudo ka badan inta loo baahan yahay. Koontooyinkaaga isticmaalaha ayaa sida caadiga ah la xidhayaa markaad ka tagto waxbarashada iyadoo macluumaadka la tirtirayo ama aan la aqoonsanayn karin magaca cid leh wakhti taas ka dib. Tani waxay sidoo kale khuseysaa waxyaalaha lagu kaydiyo cida wax noo keenta (iyadoo ay ku jiraan adeegyada cloud-ku). Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira macluumaad sida uu sharcigu dhigaayo ay tahay inaanu keydino muddo dheer, sida macluumaadka maamulka ee qaarkood, sida natiijooyinka/darajooyinka ama dukumeentiyada biilka. Kuwaas waxa la geynayaa qolka kaydka iyagoo la kaydinaayo waxbarashada markey dhamaato ka dib. Taas waxay khuseysaa xataa shaqadayada dugsiyada ee caafimaadka jidhka iyo cilmi nafsiga, taas waxa la keydinayaa ugu yaraan 10 sanno sida waafaqsan sharciga hadda jira. Waxaad trygg.academedia.se ka helaysaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan inta aanu keydinayno macluumaadkaaga shakhsiga.

Miyaad dooneysaa inaad wax dheeraad ah ogaato?

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan maareynta macluumaadkaaga, fadlan la soo xiriir ugu horeyn dugsigaaga. Waxaad xataa xiriir la sameyn kartaa masuulkaaga ilaalada xogta oo laga helo dataskydd.gymnasiet@academedia.se.

Haddii aadan is laheyn si wanaagsan ayaa lagaaga jawaabin su'aalahaaga ayaad had iyo jeer AcadeMedia kala soo xiriiri kartaa emaylkoodainfo@academedia.se markaas ayaanu ku caawin karnaa.

Kor waxa ku xusan waa turjumaad laga soo qaatay qoraallada iswiidhishka ah oo taariikhdiisu tahay 1 Juun 2018.